

Somaliska

WARBIXINTA BUKAANKA

Adiga oo ah qofka loo qoray Suliqua

Buugyarahan waxaa loo qoray kuwiina qaba sonkorta oo uu dhaqtarkoodua u soo qoray Suliqua (insulin glargine + lixisenatide). Ula jeedka ugu wayn ee dhamaan daaweynta sonkorta waa in lagu guulaysto habka ugu caadiga ah ee heerka sonkorta dhiiga ee suurtagalka ah lana dareemo wanaag isla waqtigaas.

Hadii aad qabto wax su'aala ah oo ku saabban daaweynta sonkortaada waa inaad marna ka caga jiidin inaad su'aasho daqtarka ama kalkaaliyaha.

Maxay tahay Suliqua, maxaa se loo isticmaalaa?

Suliqua waa lrbad daawo oo loo isticmaalo cudurka sonkorowga, waxayna ka kooban tahay labo walhood:

- Insulin glargine – Nooca insulinka oo waxtar dheer leh si ay wax uga tarto sonkorta dhiiga muddo 24 saacadood ah maalintii
- Lixisenatide – oo lagu magacaabo GLP-1 analogue, waxay wax ka tartaa in jirku iskiis u soo saaro insulin taas oo jawaab u noqon karta sonkorta dhiiga in uu kor u kaco iyo in ay suurta galiso in sonkorta cuntada ku jirta ay si fudud u gasho jirka.

Suliqua waxaa loo isticmaalaa si loogu daaweyyo nooca labaad ee sonkorowga (Type 2 diabetes) ee laga helo dadka waa weyn si ay u xakameyso heerka sonkorta dhiiga marka uu kor u kaco. Waxaa si wadajir ah loola isticmaalaa daawada Metformin marka daawooyinka kale aaney wax katari karin xadidaada sonkorta sonkorta.

Daawooyinkan kale waxaa ku jiri kara daawooyinka sonkorowga oo kiniino ah sida (metformin, sulfonylurea) ama insulin.

Haddii aad isticmaasho daawooyin kale, la tasho dhaqtarkaaga haddii ay tahay inaad joojisid marka aad bilowdo in aad isticmaasho daawada Suliqua.



Sida loo isticmaalo Suliqua

Markasta u isticmaal daawada sida dhaqtarkaagu kugula taliyo. Dhaqtarkaagu wuxuu kuu sheegi karaa inaad isticmaasho qiyaas kale marka loo barbar dhigo qiyastii hore ee insulinka. La tasho dhaqtar, shaqaalahaa farmashiyaha, ama kalkaaliso caafimaad haddii wax shaki kaaga jiraan.

Iyada oo ku xiran qaab nololeedkaaga, natiijada ka soo baxda sonkorta dhiigaaga iyo daawooyinka hore ee insulinta ayaa dhaqtarkaagu kuu sheegi doonaa:

- Qiyaasta inta aad ka isticmaali karto Suliqua maalin kasta iyo waqtiga maalintii.
- Marka la qiyaasi karo heerka sonkorta dhiiga iyo haddii lagaago baahdo inaad baarto kaadidaada.
- Marka aad kordhin karto ama aad yareyn karto qiyaasta daawada.

Dhaqtarkaaga waa uu kugula talin karaa inaad isticmaasho Suliqua iyo daawooyin kaleba marka sonkorta dhiiga kacsan tahay.




Qiyaas intee le'eg ayey tahay in aad isticmaasho

Suliqua 100 unug/ml oo lagu darey +33 micrograms/ml oo ah irbad lagu sii buuxiyey qalinka irbadaysan:

- Qalinkan wuxuu cabirkiisa qaadasho u dhaxeeyaa 30 ilaa 60 talaabo qaadasho oo ku jira hal duritaan, oo ah hal talaabo qaadasho.
- Talaabo qaadasho kasta oo aad hore u maroojiso waxay ka kooban tahay 1 unug oo insulin glargin ah iyo 0.33 micrograms ee daawadaa lixisenatide.

Daawadaada Suliqua waxaa laguugu diyaariyey talaabo qaadasho ahaan. Qiyaasta muraayada ee qalinka irbadaysan waxaa uu ku tusinayaa qiyaasta nambarka ee Suliqua lagugu duri karo. Ha isticmaalin in kabaden 60 qiyaas qaadasho.



Goorma ayaa laisku duri karaa Suliqua

Isticmaal daawada Suliqua hal mar maalintii hal saac gudhood raashinka ka hor. Suliqua waa in la isku duraa ka hor cuntada isla maalin kasta, marka aad doorato xiliga cuntada kuugu haboon. Iskaga dur Suliqua caloosha ama korka bowdada. Ha hilmaamin in aad kala du'do meelaha irbada.


Kahor inta aanad isku durin Suliqua

- Markasta la raac tilmaamaha la socda waraaqdan macluumaadka bukaanka.
- Haddii aanad raacin dhamaan tusaalooyinka waxaa dhici karta in aad u isticmaasho si aad u badan ama aad u yar irbada Suliqua.

Si aad uga feejignaato khaladaad: markasta iska hubi kartoonka daawada iyo qoraalka ku kor dhagan qalinka irbada ka hor duris kasta si loo hubiyo in aad heysato qalinka irbada saxda ah, gaar ahaan haddii aad isticmaasho in kabadan hal irbad oo daawo ah. Weydi (La tasho) dhaqtar ama shaqaale farmashi haddii shaki ku galoo.

Haddii aad isticmaashay in badan oo ah Suliqua

Haddii aad isku durtay in badan oo daawadan ah, sonkorta dhiiga heerkeedu hoos ayuu u dhici karaa (hypoglycaemia). Iska cabir sonkorta dhiigaaga oo cun cunto badan si aad uga hortagto in sonkorta dhiigaagu hoos u dhacdo.




Marka la isku duri karo Suliqua

Haddii aad hilmaantey isticmaalka Suliqua

Haddii aad hilmaantay qiyaasta Suliqua ama aanad isku durin in ku filan insulin, sonkorta dhiiga kor ayey u kici kartaa (hyperglycaemia). Haddii loo baahdo Suliqua waxaa la isku duri karaa xiliga kale ee raashinka.

- Ha isku durin labanlaab qiyaasta si aad ugu guddo qiyaastii la hilmaamey
- Ha isticmaalin labo duris maalintii.
- Hubi sonkorta dhiiga kadibna isku dur qiyaasta xigta ee waqtiga caadiga ah.



Sida loo xafidi karo Suliqua

Ku xafid daawooyinka meel ka fog aragtida ilmaha oo aanay gaari karin.

Isticmaal ka hor inta aan la gaarin waqtiga daawada dhacayso sida ku cad xirmada ama qoraalka qalinka ee ka dambeeya "EXP". Taariikhda dhicitaanka waa taariikhda sida ku cad bisha.

Ka hor isticmaalka ugu horeeya.

Ku xafid qaboojiye heerkulkiisu yahay (2°C - 8°C).

Waa in aan la fariisin oo aan la galin qeypta qaboojiyaha ee wax fariisia ama barafeysa. Ku xafid qalinka cirbadaysan sanduuqiisa maadaama u qoraxda u nugul yahay.

Kadib isticmaalka hore ama qalimo dheeraad ah.

Qalinka irbadaysan waxaa la hayn karaa muddo 28 maalmood ah meel ka baxasan qaboojiyaha, laakiin ka hooseysa (25°C). Tuur qalinka wixii ka danbeeya waqtigaas.

Dib ha u galin Talaagada ama qaboojiyaha waana in aan la fariisin ama baraf laga dhigin. Ku xafid qalinka cirbadaysan ka ilaali kulalyl toos ah iyo iftiinka qoraxda toos ah. Daboolka wax xafidaa waa in dib loogu celiyo qalinka cirbadaysan ka dib markasta oo la isduro.

Ha ku dhaafin qalinka cirbadaysan baabuur dhexdiis maalin si qayral caadi ah u kulul ama u qabow. Ha dhigin qalinka cirbadaysan meel iyadoo irbadu la ku xiran tahay.


Daawooyinka waa in aan lagu dhix tuurin biyaha wasakhda ah ama guriga qashinkiiisa. Waydii shaqaalahi farmashiyaha sida loo tuuro daawooyinka aan la isticmaaleyn. Taxadarkaas oo dhan waxaa loo sameynayaa sidii loo ilaalin lahaa deegaanka.

Waxyaabo kale


Wargalin saameyno (Waxyeelo)

Haddii aad aragto waxyeelo, la hadal dhaqtar, shaqaale farmashiyaha ama kalkaaliso/kalkaaliye caafimaad. Tani waxay kaloo khuseysaa wax alla iyo wixii waxyeelo ah oo aan lagu sheegin macluumaadkan.

Soo wargalin waxyeelo markaad sameyso waxaad ka qayb qaatan kartaa kobaca macluumaadka la xiriira amaanka daawada.



Qalinka irbadaysan



Suliqua SoloSTAR® waa qalinka la sii buuxshay oo qiyaasta daawada loo diyaariiyay talaabooyin kala ah hal unug. Qiyaasta qaadasho ee ugu badan waa 60 unug halkii isdurid.

Suliqua® (insulin glargin + lixisenatide) R, F, A10AE54, 100 unug/ml + 50 micrograms/ml, waa dareere irbad, qalinka irbadaysan oo la sii buuxshay iyo 100 unug/ml + 33 micrograms/ml dareere irbad, qalinka cirbadaysan oo la sii buuxiyey. **Tilmaamid:** Suliqua waxaa loogu talagalay, iyadoo lala isticmaalayo metformin, in lagu daaweyo dadka qaangaarka ah ee qaba nooca labaad ee sonkorowga si ay wax uga tarto xadidinta glycaemic marka aan xadiidnaan ku filan laga helin kallya isticmaalka metformin ama lala isticmaalka cabitaanka glucose oo afka laga qaato si loo yareeyaa daawo ama insulinta asaasiga ah (basal insulin). **Dignii iyo taxadar:** Suliqua waa in aan loo isticmaalin dadka bukaanka ee qaba nooca koowaad ee sonkorowga (Type 1 diabetes mellitus). Warbinx dheeraad ah, ka eeg www.fass.se. **Baakadayta:** Suliqua SoloStar 3x3 ml qalimo iyo 5x3 ml qalimo. Sanofi AB, Box 30052, 104 25 Stockholm, tel: +46 8 634 50 00, www.sanofi.se. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan daawooiyinkayaga, fadlan la soo xirir: infoavd@sanofi.com. Taariqda dib u firriintii ugu danbaysayee Koobitaanka Dabeeecada Badeecada: Bisha labaad ee sanadka 2017

▼ Daawaadan waxaa ku xiran la socosho dheeraad ah. Warbin dheeraad ah, fadlan ka fiiri www.fass.se.

Qoraalo

Sú'aalaha ku saabsan badeecadahayaga sonkorta
020-52 68 87

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo quseeya sonkorowga www.insulin.se
Waxaad xataa ka aqrin kartaa noocyada kala duwan ee insulinta barta ahn www.fass.se

Fadlan u aqri buugyarahaa bukanaka si taxadar leh.